

صفة الوضوء

Tilmaanta Wayso-qaadashada

Af-soomaali باللغة الصومالية


alsarhaan.com
sarhaan.com

هيئة سرحان

مترجمة باللغة الصومالية

كيفية الوضوء	Habka wayso-qaadashada
السلام عليكم ورحمة الله وبركاته	Asalaamu Calaykum Waraxmatullaah
جئتُ اليومَ لنتعلمَ معاً كيف نَتوضئ	Maanta waxaan baran doonaa sida loo waysaysto.
قبل الوضوءِ لا بدَ أنّ نذكرَ الله تعالى، فنقُول: بسمِ الله	Waysada ka hor, waxaa waajiba inaan Ilaahay xusno, oo aan niraahno "Bismillaah".
ثم نَغسلُ كفينا جيداً ثلاثَ مرات وينبغِي أن نُدخلَ الماء بين أصابعنا، هكذا	Kaddib, waxaan saddex jeer si fiican u mayraynaa gacmaheenna, waxaana la rabaa inaan biyaha gaarsiinno faraheenna inta u dhaxaysa. Habkaas oo kale...
ثم ندخلَ الماء إلى فمنا لنغسله جيداً هكذا	Kaddib, biyo ayaan gelinaynaa afkeenna si aan si fiican ugu maydhno. Sidaas oo kale...
نفعل ذلك ثلاث مرات، وهذا الفعل يسمى بالمضمضة	Arrinkanna saddex jeer ayaan samaynaynaa, habkan waxaa lagu magacaabaa "luqluqasho".
ونجعل بعض الماء في أنفنا ونخرجُه مرة اخرى. نفعل ذلك ثلاث مرات ايضاً. وهذا الفعلُ يسمى بالاستنشاق والاستنثار .	Sidoo kale, biyo ayaan sankeenna gelinaynaa, kadibna waan ka soo saaraynaa, habkanna -sidoo kale- saddex jeer ayaan samaynaynaa. Qaabkanna waxaa la yiraahdaa "sandaarsi".
ثم نغسل وجهنا كاملاً هكذا. ثلاث مرات.	Kaddibna, wajigeenna oo dhammaystiran ayaan u maydhaynaa sidan... Saddex jeer.
وينبغي أن يشملَ الماء الوجه كله من الأذنِ اليمنى إلى الأذنِ اليسرى.	Waxaana habboon in biyaha la gaarsiiyo wajiga oo dhan, laga bilaabo dhegta midig ilaa laga gaadhayo dhegta bidix.
ومن أعلى الجبهة الى أسفل الذقن كما ترون.	Korna inta laga gaadhayo dhafoorka, hoosna biyaha waxaa la gaarsiinayaa lafta gadhka meesha kahoosaysa. sida aad u jeeddaan..

ثم نغسل يدينا ثلاث مرات من اطرافِ اصابعنا الى المرفقين. هكذا.	Kaddibna, gacmaheenna ayaa mayraynaa saddex jeer, laga bilaabo cirifka u sarreeya faraheenna, ilaa laga gaadho suxulka.. sidan oo kale..
نبدأ باليد اليمنى أولاً. تليها اليد اليسرى.	Marka hore, waxa aan ku bilaabaynaa gacanta midig, kaddibna waxa aan ku xejinaynaa bidix.
ثم نقوم بمسح رأسنا كله مرة واحدة.	Kaddibna, waxa aan masaxaynaa madaxeenna oo dhan, hal mar.
نبدأ بالمسح من الأمام الى الخلف. ثم من الخلفِ الى الامام كما تشاهدون.	Innaga oo ka bilaabayna xagga hore, una kaxaynaynaa gadaal. Kaddibna, gadaal ayaan ka soo celinaynaa oo waxaan keenaynaa dhanka hore ee madaxa. Sidaad arkaysaan..
ويمكن أن نمسحه من الأمام إلى الخلف فقط. اذا كان كثيفا.	Waxaan samayn karnaa sidoo kale, inaan masixitaanka hore ka kaxayno oo aan gadaal u kaxaynno oo keliya, waa marka ay timuhu badan yihiin.
ثم نمسح أذنينا معا من الداخل والخارج مرة واحدة بالماء الذي مسحنا به رأسنا منذ قليل.	Kaddibna waxa aan si wadajir ah u masaxaynaa labadeenna dhegood, gudo iyo korba, halmar oo keliya, waxaanan ku masaxaynaa isla bixiyihii aan ku soo masaxnay madaxa.
ثم نأتي إلى الرجلين فنغسلهما الى الكعبين جيدا، ثلاث مرات.	Kaddib, waxaan u imanahnaa labada lugood, waxaanan u maraynaa si fiican ilaa wixii loo gaadho labada canqow (saddex jeer).
نبدأ بالرجل اليمنى اولا، ثم نتبعها بالرجلِ اليسرى.	Waxaan ku bilaabaynaa marka hore lugta midig, kaddibna waxaan raacinaynaa lugta bidix.